

**AYAANKA  
ABWAANKA**



XARUNTA DHAQANKA  
IYO SUUGAANTA  
FAARAX SHUURIYE

## **LAASHIN KADARE: KAADIRKII FARQORIDDA AFKA SOOMAALIGA**



|| DHULKU DADKOO DHAN WOW DHEXAYS  
DHIISHAASE NINBA MEEL DHIGTAAI  
  
DHAXALKA HIDDDE WAA DHIGAAL  
WAX NOO DHIMMANNAA WAA DHACAAN  
  
DHICIS LAGAMA DHURSUGOO  
WIXIISKU DHIIGA WAYS DHAXLAAN  
  
DHAANRAAC DHAQANKA WAALIDKOOD  
DHASHAA KA LEEXATAAN DHAHNAAI" ||

LAASHIN DR XUSEEN SH. AXMAD 'KADARE'  
1943 - 01/02/2015

Ayaanka Abwaanku, waa banaamij ay daaddihiso xarunta dhaqanka iyo suugaanta Abwaan **Faarax Shuuriye** AUN, isla markaana xus iyo xasuus looga dhigo halyeeyadii soomaaliyeed ee bulshadooda soo gardaadiyey waayo adagna usoo halgamay, sida: laashimiinta, abwaannada, hal-abuurrada kale, qorayaasha, af-aqoollada iyo dhammaan inta daljire-nimada lagu xasuusto. Waa barnaamij taxane ah oo ay xarunta abwaan **Faarax Shuuriye** iyo maamulkeeda guud ee oo ugu horreeyo abwaan **Bashiir M. Xersi** ay kolba halyey ku soo qaataan. Haddaba, barnaamijkaas qeybtiiisa afaraad ee gugaan ayaa lagu xusay kaallinti iyo sooyaalkii laashin **Xuseen Sh. Axmed Hilowle "Kadare"** ALLE ha u naxariistee.

Madashaas lagu xusayey Dr, laashin: Xuseen Sh. Axmed Hilowle "Kadare" (AUN) waxa ka soo qeyb-galay aqoonyahanno badan oo soomaaliyeed isla markaana kasmadi iyo kaallintii Kadare ku lafaguray. Madashaas dadka ka hadlay, waxaa ka mid ahaa:

1. Qoraa: **Cabdicasiis Cali Ibraahim "Xildhibaan"** Oo sooyaalka laashin Kadare ku dheeraaday.
2. Qoraa: **Cabdiraxmaan Abtidoon** oo si aad ah uga sheekheyey fartii uu gaarka u lahaa laashin Kadare ee loo yaqaannay: "**Kadariya**".
3. Laashin: **Xasan Cabdulle Calasow "Shiribmaal"** oo suugaanta laashin Kadare soo bandhigay.
4. Borofaysar: **Joorji Baantu** oo suugaanta, sooyaalka iyo saaxibtinimadii Kadare soo bandhigay.
5. Borofaysar: **Cabdalla Cumar Mansuur**, kana hadlay aqoontii uu u lahaa Kadare.
6. Borofaysar: **Cabduqaaddir Ruumi** oo aad u faaqiday dhiganaha Waasuge iyo Warsame ee uu qoray laashin Kadare.
7. Abwaan **Cismaan Abdullaahi Guure** oo ka sheekheyay waxyaabihii uu caanka ku ahaa laashin Kadare.

8. Marwadii uu ka geeriyooday laashin Kadare, **Duniyo Rooble Maalin** oo ku dheeraatay daljire-nimadii laashin Kadare.
9. Dr, qoraa, **Xuseen M. Cabdulle "Wadaad"**
10. Barbaariye, qoraa: **Bashiir Cali Xuseen** oo ay saaxibbo ahaayeen laashin Kadare
11. Weriye **Cabdi Good**, iyo aqoonyahanno aad u tiro-badan.
12. Kulanka waxaa xariirinayey, isla markaana isku dubbaridayey, abwaan, qoraa: **Cabdiraxiin H. Galayr.**

**AYAANKA ABWAANKA**

**XARUNTA DHAQANKA  
IYO SUUGAANTA  
FAARAX SHUURIYE**

## **LAASHIN KADARE: KAADIRKII FARQORIDDA AFKA SOOMAALIGA**

**“ DHULKU DADKOO DHAN WOW DHEXAYS  
DHIISHAASE NINBA MEEL DHIGTAAI**

**DHAXALKA HIDDE WAA DHIGAAL  
WAX NOO DHIMMANNA WAA DHACAAN**

**DHICIS LAGAMA DHURSUGOO  
WIXIISKU DHIGA WAYS DHAXLAAN**

**DHAANRAAC DHAQANKA WAALIKOOD  
DHASHAA KA LEEXATAAN DHAHNAA! ”**

LAASHIN DR XUSEEN SH. AXMAD 'KADARE'  
1943 - 01/02/2015

Abwaan Cismaan  
Cabdullaahi 'Guure'

Qoraa C/casilis  
'Xidhibaan'

Prof Cabdalla Mansuur

Qoraa C/raxmaan  
M. Abtidoon

Prof Giorgio Banti

Qoraa Xasan  
Shiribaal

Prof Cabdulqaadir  
Ruumi

**kulanka 4aad**

Xiriirin: Cabdiraxiin H. Galayr

TALAADO 02/02/2021  
20:50PM GEESKA AFRIKA

ZOOM f LIVE

## SOOYAALKA LAASHIN KADARE



*Sooyaalka iyo shiribyada Kadare*

Waa kuma Kadare?

Laashin: **Xuseen Sheekh Axmed Hilowle “Kadare”** (A.U.N.) wuxuu ku dhashey: tuulo hoos timaada degmada Cadale ee ka tirsan gobolka shabeellada dhexe amminku markii uu ahaa; 1934-tii, waxaa uu ka mid ahaa qoys ahlu diin ah, gaar ahaan aabbiihiis waxa uu ahaa Sheekh ka mid ah hoggaamiyayaasha dariiqooyinka diiniga ah, gaar ahaan dariiqada Axmadiya. Kadare aabbiihiis waxa uu dhintay: isaga oo sagaal gu’ jir ah.

Halkaa waxa ka muuqda inuu Kadare ku soo barbaarey qoys diimeed, sidaa darteed, waxaa uu noqday barte (ardey) ka mid ah dugsi qur'aanka laga barto oo ku yiillay duleedka degmada Cadale oo ay degaan beeshiisa **Cabdulle Galmaax**, waxaase xusid muddan in aabbiihiis uu cilmiga ka soo bartey degmada **Warshiikh**, uuna ka aasaasay dugsi qur'aan. Markii dambase, waxaa uu u leexday inuu xoogga saaro dhanka ruuxda iyo suufiyadda oo uu ka mid noqday dariiqada **Axmadiya** ee uu ka qaatay **Shiikh Cali Maye** oo reer **Marko** ahaa kana soo jeedey qabiilka Duruqbo.

Shiikh **Axmed Hilowle** oo **Kadare** aabbiihiis ahaa, waxa uu noqday; hoggaamiye diineed oo ay ku soo hirtaan dadka degaanka deggan oo dhan, qayb wayna ka qaatay dhismaha dugsiyada qur'aanka iyo faafiddooda una diri jirey macallimiin dadka waxbara. Markii uu dhintey **Shiikh Axmed** waxaa uu **Kadare** la soo safray hooyaddii oo ay soo aadeen **Muqdisho**, gaar ahaan waxaa ay soo degeen degmada *warta nabadda* (*Ex-Wardhiigleey*), halkaas ayuuna ka sii waday barashadii qur'aanka, asiga oo galay dugsi uu bare ka ahaa:- macallin **Xuseen Gaab** oo ah macallinkiisii labaad ee qur'aanka baray, aabbiihiis ka dib.

Laashin Kadare, waxa uu ku biirey casharradi iyo cilmigii ka socday masaajidda magaalada Muqdisho ee xilligaas, sida daruustii uu aqrin-jirey: **Shiikh Muxyaddiin Raage** oo uu ka

aqrirstay kutub badan oo ay ka mid yihii; *safiinada salaadda, Abuu Shujaac, Minhaajka, Ajruumiyadda IWM*. Shiikh Muixadiin wuxuu ka mid ahaa; ardadii wax ka baratay Shiikh Axmed oo Kadare aabbihii ahaa, waayo, Shiikh Axmed xerta wax ka baratay waxa uu markasta fari jiray inay faafiyaan cilmiga iyo dariiqada Axmadiyadda.

Waxay ahaataba, laashin: **Xuseen Sh. Axmed (Kadare)** markii uu noqday 13 gu' jir waxaa uu ku biirey iskuul lagu magacaabo; “**Cardinale Masaea**” oo ku agyiillay dugsigii macallin Jaamac ee magaalada Muqdisho, waxaana lagu dhigi jiray iskuulkaas afka Talyaaniga, waxaase jirtay; in soomaalidu aysan amminkaas u oggoleyn carruurtooda dugsiyo noocaan oo kale ah, iyaga oo ka welwelayey diinta, haddana Kadare waxaa uu ku guuleystey inuu ku biiro, waayo waxaa uu ahaa qof fahmi karay qiimaha uu cilmigu leeyahay, waxa uuna ku soo barbaarey reer qaddariya cilmiga iyo isaga oo soo maray xernimo, ahna nin yaqaanna faa'iidata barashada cilmiga.

Intaa kuma uusan ekaane, waxaa uu ku biiray iskuul ama dugsi ku yiillay Billaajo Carab oo ah degmada Shibus oo lagu dhigi jirey afka Carabiga waxaa uuna ku guuleystay inuu dhammaystiro marxaladda hoose labaada iskuul ee uu wax ka baranaayey, balse, waxa uu ku gaabsaday oo kaliya iskuulkii Talyaaniga oo waa uu ka tegay kii Carabta, waxaa uuna xoogga saaray inuu kor u qaado barashada afka Talyaaniga oo uu ka baran jirey qayb lagu barto oo raacsanayd kaniisaddii ka dhisnayd Xamar.

Waxaa dhacday: in fasax ka mid ah fasaxyadiisa uu safar ku aaday meeshii uu ku dhashay, si uu uga qayb galo siyaarada iyo alla bariga loo sammeeyo aabbihii Shiikh Axmed. waxaa uuna kansho u heley inuu guursado markaa gabar uu adeerkii dhalay, ka dibna, waxaa uu ku soo noqday Xamar si uu u sii wato dadaalkii uu ugu jiray waxbarasha, balse, muddo yar ka dib waxaa uu ku noqday meeshii uu ka yimid oo ay reerkiisu degganaayeen, waxaana u suuro gashay inuu deegaannadaa ka sammeeyo dukaan dadku ay cunnada ka iibsadaan, waxaa kale uu goobtaa ka aas-aasay xarunta xisbigii gobonnimodoonka ee (**SYL**) oo uu ka ahaa xubin firfircoo gugu, markii uu ahaa: *(1956-dii)*. halkaasna waxa uga billowday dhaqdhqaaq siyaasadeed lagu baadi goobayo gobonnimo iyo in laga xuroobo gummeysigii Talyaaniga.

Muddadii Kadare uu joogay Cadale waxaa uu qayb weyn ka qaataj baraarujinta dadweynaha iyo u doodista xuquuqdooda, waxaase dhacday; in gummeysigii talyaaniga ee Cadale joogay uusan ka warqabin danta ummada, balse, dhaqdhqaaqii siyaasadeed ee Kadare la yimid ay keentey inay baraarugaan, Talyaanigana lagu qasbo inuu ummadda wax u qabto, waxaana jirtay: markii uu maamulkii gumeysiga ee degaankaasi uu diiday in qof aad u xanuunsaday loo qaado Xamar ay dadku la dagaallameen, waayo waxaa degmada yiillay baabuur Ambalaas ah, taana waxay keentay in Talyaanigu odayashii ka codsado in Kadare degaanka ka baxo taas oo ku qasabtay inuu soo aado Xamar, soona xiro dukaankii uu ku lahaa si uu u sii dhammeystirto waxbarashadiisa.

### Farta Kadare

፩ ፪ ፫ ፬ ፭ ፮ ፯ ፻ ፳ ፴ ፷ ፸ ፹ ፻ ፻

፳ ፶ ፵ ፶ ፷ ፸ ፹ ፻ ፻ ፻ ፻ ፻ ፻ ፻

b t dʒ h x d r sʃ d ɿ

፩ ፪ ፫ ፬ ፭ ፮ ፯ ፻ ፻ ፻ ፻ ፻ ፻ ፻

፳ ፶ ፵ ፶ ፷ ፸ ፹ ፻ ፻ ፻ ፻ ፻ ፻ ፻

g f q k l m n w h j

፩ ፪ ፫ ፬ ፭ ፮

፻ ፲ ፳ ፴ ፵ ፶

a e i o u

Muddaddii uu Kadare ku noolaa deegaaanka *Cadale* waxaa u suuro gashay inuu qoro ama allifo far ay suurto gal tahay in lagu qoro afka Soomaaliga oo aan markaa qorneyn, waxaa uu arrinkaas ku soo bandhigey xaruntii leegada gugu, markii uu ahaa; 1958kii, waxaana muuqatay inuu tartan kula jirey far iyo xaruuf uu qoray: Cusmaan Yuusuf Keenidiid oo la dhihi jiray; Cusmaaniya.

Gugii, 1959-kii waxaa uu Kadare ka noqday guddigii af Soomaaliga ee ay sammeysay dowladdii ku meel gaarka ahayd ee uu hoggaaminayay: **Cabdullaahi Ciise Maxamuud**, waxaana ka mid ahaa guddigaa dad ay ka mid yihiin: **Yaasiin Cusmaan Keynadiid, Ibraahim Xaashi Maxamuud, Muuse Galaal, Shire Jaamac, laashin Kadare** iyo kuwo kale. Waxaa jirtay: (18) far oo kala nooc ah. Afar far oo ku qoran xuruuf laatiini ah, seddex far oo ku qoran xaruur Carabi ah iyo {11-far} oo af-Soomaali ah, waxaase meel laysla dhigay; in loo kala hormariyo laatiiniga, midda Kadare waxaana loo bandhigay “yuuneskoo” (Unesco) 1965-kii. Kadare waxaa uu ka mid noqday guddigii farta Soomaaliga ee lagu dhawaaqay gugii, 1970-kii.

*Kadare, horumarka saxaafadda iyo dhalinyarada*



Gugii 1961-kii waxaa uu Kadare noqday shaqaale ka tirsan idaacadda Muqdisho qaybta fanka oo uu madax ka ahaa, isaga oo wariyena noqday. Xilliggii uu Kadare shaqadaa hayay waxaa u hormariyey baraamijyada idaacadda ka baxa, waxaana uu caan ku ahaa barnaamijkii uu soo jeedin jirey ee hiddaha iyo dhaqanka, is la markaana raadraaci jiray suugaanta Soomaaliyeed waxaa uu barnaamijkaasu noqday mid ay aad u xiiseeyaan dhageystayaal aad u tiro badan. Gugii 1966-kii waxaa uu soo bandhigay Kadare in la mideeyo dhammaan ururrada dhalinyarada waddanka oo markaa tiradoodu ay gaaraysay ilaa 12 urur, run ahaantiina waxaa uu ku guuleystay arrinkaas, marka laga reebo hal urur oo ka jirey waqooyiga Soomaaliya, ka dib markii la sammeeley ururkaa oo ay ku midoobeen dhammaan ururada Soomaaliyeed waxaa mudane, dr. laashin: **Xuseen Shiikh Axmed (Kadare)** uu noqdey madaxdii ugu horreeyay ee hoggaamiya golaha ururka dhalinyarada Soomaaliyeed, waxaana u suurto gashay ururka iyo hoggaankiisaba inay ummadda u horseedeen wax u sheegidda xukuumadda la doortay, iyaga oo adeegsanaya shirar, muxaadaroojin iyo mudaaharaadyo ku dhacaya si nabab ah, gaar ahaan marka ay dhacdo arrimo ka hor imaanaya maslaxadda dalka iyo dadkaba.

Waxaa kale oo uu ururku u yeeri jiray madaxda dowladda si uu u wayddiiyo arrimaha ay u baahan yihiin in wax laga qabto ama ay u kala caddaado. Waxaa shaqada ugu mudan ee ururka dhallinyaradu ay qabteen ka mid ahaa in ay taageero aan kala har lahayn u hayeen ururrada gobonnimodoonka ah ee amminkaa ka jirey xeebta Soomaaliyeed ee "Jabuuti" gobolka xuddiudka waqooyi bari ee NFD oo hoos imaanayay dowladda Kenya iyo goboladda Soomaali galbeed ee xabashidu ay gacanta ku haysay.

Waxaa ururradaa looga furay xafiisyo ay leeyihiin gudaha goobta uu ururka Soomaaliyeed lahaa iyo iyaga oo u fidiyey gacan kaalmeyn ah, sidoo kalena ururku waxa uu

diray, dhallinyaro soomaaliyed oo daljirayaal ah, kana qayb qaatax xuraynta dhulka NFD oo gaarayay ilaa (500) oo qofood iyo iyadoo la qabtay gugii 1967-kii shirweyne looga hadlayay in isbeddel lagu sameeyo magaca ururka xuraynta ee Ogaadeen oo lagu beddelayo ururka xuraynta Soomaali galbeed, waxaana loo fidhiyay dhammaan ururradaas miisaaniyad dhaqaale oo markii hore la siin jiray hoggaamiyayaasha qabiillada, waxaa kale uu shirweynahaasu uu soo saaray in ururka midowga Afrika uu ka guuro Adis Ababa una guuro meel kale oo Afrika ka mid ah.

Go'aannadaa shirweynaha ururka dhalinyarada Soomaaliyed ee uu hoggaaminayay Kadare dhammantiis waa ay aqbashay xukuumaddii markaa jirtay, balse, markii uu waddanka ka dhacay afganbigii askartu ururkii dhallinyarada waa la baaba'shay, **Xuseen Sheekh Axmed Kadarena** markaa waxaa uu ahaa qof ka istaqaallooday shaqadiisii si uu uga qayb qaato doorashooyinkii baarlamaanka, in kastoo uusan ka qaybqaadan sababo dhaqaale awgeed, waxaana uu u wareegay dhanka ganacsiga isaga oo furay baar casri ah oo ku yaallay Xamar, ka dibna, waxaa uu aas-aasay shirkad ku howllan alaab keenista iyo dhoofinta oo loogu magac darey: "**Kadimpax**" Dhaqaale raadinta waxaa uu ku sheegey Kadare inuu kansho u helo dhaqaale uu ku hormariyo mashaariicda aqooneed ee uu hiigsanayo iyo si uu u daabaco buuggaagta uu qoray oo markaa gaaraysay ilaa iyo **7-buug**. arrimahaas dhaqaale raadinta ah uma suuro galin, waayo waxaa uu ku mashquulsanaa howlihi loo igmaday ee qorista farta Soomaaliga, sidaa darteedna, waxaa uu xiray baarkii u furnaa shirkaddiina albaabada ayuu u laabay.

### ***Kadare iyo Akadeemiyadda cilmiga, fanka iyo suugaanta***

Gugii 1973-dii waxaa loo magacaabay inuu ka mid noqdo xubin ka tirsan Akadeemiyadda Cilmiga, fanka iyo suugaanta oo uu ku kallifay wasiirkii hiddaha iyo tacliinta sare **Maxamed Aadan Shiikh**, waxaa uuna noqday Kadare madaxa qaybta suugaanta gaar ahaan luqadda.

Waxaa uu ka mid ahaa Kadare dadkii lagu aas-aasay iyo xubnihii ugu firfircoona, waxaana xusid mudan in Akadeemiyadda ay ka shaqeenayeen, dad ku xeel dheer sooyaalka iyo dhaqanka Soomaaliyed oo gaareyay 170 ruux oo isugu jaray rag iyo Dumar. Howsha Akadeemiyadduna waxay ahayd; uruurinta agabka Soomaaliyed ee xiriirka la leh sooyaalkeenna iyo dhaqankeenna iyo iyadoo qayb weyn ka qaadan jirtay dhiirri gelinta iyo horumarinta allifaadda iyo baarista cilmiga ku dhisan, waxaa kale oo ay heshiis la geli jirtay ururrada iyo hay'adaha ku howlan dhaqanka iyo sooyaalka si loo hormariyo dhaqanka iyo dhaxalka Soomaaliyed iyo in baaritaan xooggan laga sameeyo dhammaan dalka oo idil iyo in la abuuro guddiyo ka howlgala arrinkaas. Sidaa darteed waxaa Kadare u suuro gashay inuu meelo badan oo ka mid ah dalka uu ku soo wareego.

### ***Kadare iyo soosaarka aqoonta***

Waxaa dad badan ay la socdaan in laashin Kadare uu ka tegey raad-raac fican oo uu ku soo kordhiyey dhaqanka iyo suugaanta, taas oo ka kooban qaybo kale duwan ha ahaato tix iyo tiraab, qoraal iyo wax qalab ku duuban, waxaanse ka tilmaameynaa qoraalka buugga ee uu soo saaray sida buuggiisa **Waasuge iyo Warsame (safarkii soddonka maalmood)**, laashinku, buuggaas waxaa uu uga hadlayaa iska hor imaadka dhaqamada sida dhaqamada ajnabiga iyo midka waddaniga ah, dhaqanka baadiyaha iyo kan reer magaalka, dhaqanka waayeellada iyo kan dhallinyarada.

Si uu u caddeeyo farriinta uu rabo inuu dadka gaarsiiyo waxaa uu qoraagu tusaale ahaan u soo qaatax dadyow ka soo jeeda Jowhar iyo kuwo ka soo jeeda Mudug. Run ahaantii laashin

Kadare waxaa kale ee uu leeyahay buuggaag kale oo uu ka qorey dhaqanka, shakhsiyad iyo suugaanta Soomaaliyeed.

*Siyaasadda iyo Kadare*



Waxaan soo tilmaannay in Kadare uu ahaa xubin firfircoон oo ka mid ah xisbigii Leegada ee SYL, sidoo kale waxaan soo sheegnay in uu galay damac ah inuu isku sharraxo barlamaanka Soomaaliya ka hor inta uusan afganbigii askartu dhicin, balse, ay u suuro gali weyday sababo dhaqaale aawgeed. Waxay ahaataba Kadare waxaa uu ka mid noqday tiirarkii ugu adkaa ee ka soo horjeestay dowladdii **Maxamed Siyaad Barre**, ka dibna, markii xisbigii uu ka tirsanaa ee USC ee garabka **Cali Mahdi Maxamed** uu talada la wareegey, waxaa loo magacaabey: wasiirkii warfaafinta. Kadare intaas ka dib, waxaa uu aad ugu dedaalay, in uu qayb weyn ka qaato dib u heshiisiinta Soomaalida, gaar ahaan degaannadii uu deggenaa.

Laashin: **Xuseen Sh. Axmed Hilowle "Kadare"** Alle ha u naxariistee, waxa uu noqday nabaddoon u shaqeeya dadkiisa isla markaana kala saara oo garta si caddaalad ah ugu kala xugmiya. Wuxaan tusaale usoo qaadan karnaa, mar uu ka qeybgalay heshiis laba beelood oo walaalo ah lagu dhex-dhexaadinyay waxa uu beelihi mid ka mid ah ku yiri shirib:

- **"Dalqaa waxay ku taal dariiq**
- **Dardaryadana diidimee".**

Haddaba, laashin Kadare waxa uu beeshaas iyo kuwii kaleba u sheegay inay sabraan oo ay isu dulqaataan. Mar kalena, wuxuu ku shirbay asiga oo qolo laga gardarnaa caddaaladda ugu hiillinaya waxa uu yiri:

- **Danaano da'di kaa yaroo**
- **Lagaa dileey ku soo dugtaa!.**

Eebbe ha u naxariistee Laashin: **Xuseen Shiikh Axmed Kadare** waxaa isaga iyo guddigii far Soomaaligaba lagu xusuusan karaa guushii ay u soo hoyeen afka Soomaaliyeed oo maanta meel ay joogaanba ah mid ay isku afgartaan, kuna adeegsadaan farriimahooda iyo qoraalladooda oo lagu soo bandhigo buugaag, wargeys iyo barta internetka oo laga yaabo maalin walba inay galaan ugu yaraan dhowr malyan oo Soomaali ah.

## Shiribyada laashin Kadare



*Maxay ugu baxday Kadare?*

Laashin, **Xuseen Sh. Axmed Hilowle "Kadare"** mar wax laga wayddiiyay sababta ay ugu baxday naaneysta Kadare waxa uu yiri: waxa aan ka qeybgalay riwaayad socotay 10-maalmood, riwaayaddaas ayaan uga qeybgalay magaca Kadare halkaas ayuuna iga soo raacay. Mar kalena waxa uu yiri: iyada oo gole lagu shirbayo la joogo, ayaa waxaa laashin ka mid ahaa dadka goobta joogay, ayaa laashin Kadare wayddiiyay muxuu kuugu baxyay: magacaan aad caanka ku tahay ee "Kadare" laashin Kadarena wuxuu laashinkii ugu jawaabay shiribkaan:-

- *Hal godlatoor gantuun ag-yaal*
- *Aan gaad marshaan ha gaagaxdee!*

### Dulucda shiribka

Laashinku wuxuu tusaale usoo qaatay, hasha geelu, marka ay godlato ee buraha loo soo qaado, lana doonayo in caanaha laga liiso/maalo, haddii gosha ama dhinaca gaad laga marsho, waa ay naxaysaa, ka dibna, caanihii iyo godoshii saarnayd dib ayey ugu naqanayaan oo waa ay gaagaxaysaa. Halkaas waxa ka cad laashin Kadare inuu ahaa kaftamaa aan runta la gamban, dadkana aan been ku maaweelein ee runta iyo miraheeda caddeeya, sida uu shiribkiisa ku sheegay ayeyna Kadare ugu baxday.

Shiribyada laashin Kadare ee caanka ah waxaa ka mid ah midkaan:

- *Dhulku dadkoo dhan waw dhexays*
- *Dhiishaase ninba meel dhigtaa,*
- *Dhaxalka hidde waa dhigaal*
- *Wax noo dhimanna waa dhacaan,*
- *Dhicis lagama dhur sugoo*
- *Wixiisku dhiiga ways dhalaan,*
- *Dhaanraac dhaqanka waalidkood*
- *Dhashaa ka leexataan dhahnaa.*

Shirib seddexleey ah:

- *Seddex walxaato deel ku taal*
- *Seddex kaleey dantuu roggaa,*
- *Dawacu neef dibboodayow*
- *Soo dilayow dantuu roggaa,*
- *Doobkuna naag nin soo dirtee*
- *Dibirsadoow dantuu roggaa,*
- *Daa'uud Galmaax durraantayow*
- *Kala dafoow dantuu roggaa,*

Afmeer

- *Anna inaan ka daafacee*
- *Kala diraan dantuu roggaa.*

Shiribkaas seddaxleyda ahi waxa uu noo caddeynayaa nabaddoon-nimadii laashin Xuseen Kadere ee aan hore u soo tilmaamay, wuxuuna daaha ka rogayaa inuu laashin Kadare ahaa tiir adag oo ay nabaddu ku taagneyd, isla markaana kaftanka iyo laabxaarnaanta ku caanbaxay.

**Shirib seddax seddax ku cadfan ah:**

- *Seddax walxaato ya' ku taal*
- *Seddax kaleeto yeeli mee,*
- *Waxay ku yeeli diiddana*
- *Seddax kaleeto ya' ku taal.*
- *Yacquub Abgaal yaraan naqee*
- *Aan Yuusuf duubno yeeli maa,*
- *Woxow ku yeeli diidana*
- *Yaboohsigoow hortii yiqaan.*
- *Naagtaadi yaallin kuu aheyd*
- *Aan naag yar yeesho yeeli mee,*
- *Waxay ku yeeli diiddanaa*
- *Yuf lamma loo dhigey yasee.*
- *Wadaadki ya' dhigoobana*
- *Yatiin waxeeda yeeli maa,*
- *Woxow ku yeeli diidana*
- *Yowmal qiyaamadoow yaqaan!"*

Shiribkaas iska dul akeekiman waa hab laashin Kadare uu billaabay, isla mar ahaantaana uu ku soo kordhiyey tireynta iyo kordhinta shiribka. Laashin Kadare AUN sida uu afka soomaaliyeed ugu bud-dhigay ayuu godadka suugaantana ugu bud-dhigay.

### Shirib seddaxleey ah

- *Seddaxna seddax deel ku taal*
- *In loo diraahu waa dilkood,*
- *Dafo waxay la haadday diin*
- *In loo diraahu waa dilkiis,*
- *Darab ninki qabaa dukaal*
- *In loo diraahu waa dilkiis,*
- *Dabbaal siyaasa dowladeed*
- *In loo diraahu waa dilkiis!*

Shiribyada laashin Kadare waa suugaan muc iyo miid ah oo aan laga daaleyn haddii waa la wada qorayaa aan dhahnana kama xiisa dhaceyno ee qeytaan shiribka waxa aan ku soo afxirayaa shirib ka mid ah kuwii ugu dambeeyay ee uu tiriyo laashin Kadare aun.

### Shiribkii ugu dambeeyay ee uu tiriyo

- *Toddobo aan isku tuhmaan*
- *Tolka wax uga taabaha,*
- *Tobanki toddobaatanaad*
- *Intaan ku tiirshay meel,*
- *Toddoba aan ka tuuranaa*
- *Intaan la tuhmin wayga taas,*
- *Haddaan timaha taabtanaa*
- *wax ii tafnaa jiraan tebaa,*
- *Haddaan tallaabta tuuranaa*
- *Intiis tafaan dhulkiis tubaa,*
- *Taydaana ila toosanoo*
- *Toman jiraan isku tirshaa,*
- *Meeleey tacsi faceeya taal*
- *Haddaan tagaanse is tuhmaa,*
- *Tii Allana hadday timaad*
- *Laylama tashan waa tarxiil.*

Waa shiribkii ugu dambeeyay ee uu tiriyo laashin Kadare AUN. Shiribkaas wuxuu ku bidhaaminayey inuu amminku haayo, da'duna ay ka daba timid oo uu tamar-dhigay. Shiribkaas toddobaalaha ah, waa hab curin Kadare u gaar ah ee ma jiro laashin hore u tiriyeey shirib toddoba lugood ah, ujeedku ma ahan inaan la tirin karin, balse, abuuridda tiro go'an ayaa ah garasho lays-ku dhaafay.

## Maansada laashin Kadare iyo silsilladdii DEELLEEY



Silsilladda Deelleey waxay geyiga soomaaliyeed ka curatay, 1979-1980-kii. Waa silsiladda ugu dheer, uguna hal-abuurro badan, waana silsilladda ugu ujeeddo weyn dhammaan silsilladihi sooyaalka soomaaliyeed soo maray. Waxaa lagaga hadlay waayihii jiray, sida: siyaasadda, dhaqaalaha iyo dhaqankaba. Waxayna ka dhalatay tix uu **Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye"** ku iba furay, lana magac-baxday: *Dig dheh deelka maansada, dur iyo daabaca, isku duubni wadareed, ha ka dido shan-xuubluhu.*

Deelleey oo dhaafaysay 67 maansood/jiifto ayaa waxaa isu tiriay dad gaaraya 70-hal-abuur oo ka socda dhammaan qaybaha bulshada, kana soo ka la jeeday daafaha dalweynaha soomaaliyeed, sidaa darteed murankeeda iyo ismaandhaafku waa waxtar lagu kasayo waaqica jiray, laguna baranayo nafsiyadda qofka soomaaliyeed. Haddaba, silsilladdaas Deelleey laashin: **Xuseen Sh. Axmed Kadare AUN** waxa uu ku lahaa laba maanso oo aad u mug iyo muc weyn uuna uga maansooday qeyb walba oo ay nolosha soomaalidu laheyd. Labadaas maanso tan hore, wuxuu laashinku u bixiyey: **"DAREEN-GUUD"** wuxuu si guudmar ah u cabbiray wixii uu laashinku qoonsaday ee berigaas jiray. Maansada labaadna wuxuu ugu wanqalay: **"ABWAANOW DAREENKAA!"** Waana maansada lagu soo afmeeray deelleey, wolow ay ka dambneysay maanso uu tiriyey laashin: **Cabdulle Raage Warsame "Taraawiil"** (AUN) isla mar ahaantaana aheyd wayddiimo ilaa iyo maanta aan la furin oo sidoodii u xiran.

**Maansada DAREEN-GUUD laashin Kadare waxa uu ku billaabay:**

Af daboolan dahabkii	Duunyada ka shubatoo	Gu'ya dayr ka baxayaan
Maskax darartay dookheed	Doorkeedu taliyoo	Dadku beeraleey iyo
Abwaan diiray doorkiis	Maatada daryeeshoo	Duul reer magaaliyo
Nin is diray dedaalkiis	Iskaashiga danaysoo	Misna duunya dhaqatiyo
Murti daad ah dulucdeed	Dadnimada xushmaysoo	Danwadaagto kala yahay
Hadal dahab ah dabarkiis	Daaqiyo waraabkiyo	Oo daartu dhagax tahay
Sarbeeb duwan ka duruggeed	Ku dagaasha guurkoo	Aqal darinya udub yahay
Danab dhacay dareenkiis	Isu disha qabiilnimo	Deriskeennu xabash yahay
Daah rogan dabayshiis	Waa dariqa noloshoo	Dalka maqan xorayn yahay
Dad is laayay dawadiis	Dadkoo idili soo maray	Dad fallaago naga yahay
Manjo daallan duugtood	Diiwaankina u buuxsamay.	Midnimadu daryeel tahay
Cadaw dumay duqeyntiis		Oo kan diiddan cadaw yahay
Markab degay daryeelkiis	Dabadeedna waxa yimid	Difaaceennu dhimman yahay
Qabiilnimada loo danay	Dadaalkii aqoontoo	Deyn badani magid yahay
Inta diiddan dawankood.	Cilmi diiradduu sido	Dakhliguna canshuur yahay
	Dabeecadna adeegsaday	Dadku badi sabool yahay
Da' kale Hadraawoow	Dayaxana u sahan tegay	Maamul dawladeed iyo
Duullaan cid kuma ihi	Doorkii kalee xigay	Dakanadii qabiilnimo
Mana daafacayo ruux	Dabaqadaha loollama	Derin wada dhex jiifaan
Dano gaar ahaaneed	Oo danaha kala duwan	Daliilkeedu wuxuu yahay
Dooni maayo mana rabo	Ku dagaallamaa yimid	Reer degaya inan yahay
Weys kala da' weynahay	Waxa daahiraya ugub	Kala daadsan gebigii
Teydu waa dareen guud.	Marka xigana waa duug	Dambeeyoon horuu marin.
Wax aan diidayaa jira	Waa duni cajaa'ib ah!	
Oon layga karin daa		Afartaa ma wada degay?
Ilaa aan ka dabar jaro.	Dood kalena waxay tahay	Taar ma diray digniin sida?
	Inta uu degmiyo gobol	Darsi kalena iga maqal
Afartaa ma wada degay?	Dalku magacyo leeyahay	Daacadoow dad ma ekee
Taar ma diray digniin sida?	Doox godanya buur iyo	Dawladnimadi aan helay
Dersi kalena iga maqal	Deex bariya hawd iyo	Dagaalkana u soo galay
Daacadoow dad ma ekee	Doog iyo abaar iyo	Doonnidii shiraacnayd
Duddo magac wadaagtoo	Daaq iyo dhir leeyahay	Oo calanka doogga ah
Summaddeeda duwatoo	Duunyadu irmaan tahay	Dusha sare ka taagnaa
Ceil doox ka qodatoo	Digirtiyo gallayduna	Oo dadkeedi lagu siday

<b>Damacoodu dheeraa</b>	<b>Weerar may dul joogaa?</b>	<b>Ummaddii dagaalkaay</b>
Degellada gumaysigu	Ma socdaa dagaalkii?	Duqeydii horreetyo
Ka dib dhigay xorriyaddii	Dhufays daafac maw ahay?	Da'da maanta nooleey
Dalalkeenna weli maqan		Dadkii aan af iyo diin
U dejiyay qorshaha adag	Da'da kale Hadraawoow	Iyo dhaqanka duugga ah
Una duubtay hawl culus	Murti duug ah waxay tiri:	Dirya magac wadaagnoow
Doogtii naq horadii	Nin is dilay dulqaad ma leh	Waxaan doonaya nolol
Dacaskii gumaysiga	Damac dheeri dawo ma leh	Ka dambayso gobannimo
Anigoon ka daal goyn	Indha dam ah dalxiis ma leh	Waxaan diidayaa ceeb
Dareenkiisi weli qaba	Dal abaar ah doog ma leh	Dulli iyo qabiilnimo
Shax qabiil ma ila degay?	Deelqaaf daddama ma leh	Waxaan duugayaa xidid
Hal qaadkii ma igu dagay?	Dabbaalnimo dabiib ma leh	Durriyadu u aydaa
Irmaan mawga daba tegay?	Deyn miyi dulsaar ma leh	Waxaan diranaya ubad
Mar labaad dagaalkii	Dawlad iyo qabiilnimo	Hayb diiddan iyo qolo
Dariiqii ma iga xiray?	Wax isaga daran ma leh.	Isu dumaya reeraha
Doorkii se kaa xigay		Dulucduna waxay tahay
Afarreey dib maw fray?	Afartaa ma wada degay?	Ka dambaysa camalkaas
Mayga dilay dar celiskii?	Taar ma diray digniin sida?	Dunta tooska iyo dadab
Anigoon ka daba tegin	Dersi kalena iga maqal.	La isugu dhex daadshoo
Kana daalin libintii		Dabeecada lurkeediyo
Duudsiyin xaqaygii	Daacadoow ma daaloow	Oogada dadkeedaba
Dawaqsane guhaad qaba	Qabiilnimada aan dilay	Ka daryeesha admiga
Durbaan iyo shareeriyo	Qabri daakhilkuu dhigay	Isku duubnideedey
Dafya kaban ma qaateen	Lafaheedi duugmeen	Derejada ku leedahay
Luuqdii ma daba dhigay?	Aboorkuna ku diirsaday	Duddumada aboorkuna
Aniguna ma daawaday?	Dadkii naxashka ila siday	Waxay nooga duwan tahay
Candhuuftii dib maw liqay?	Qaar doonaya jiray	Dedaalkiyo israaciyo
Daymada indhaha iyo	Taa wuxuu daliil cad ah	Lib u dirirka wadareed
Dooc maqalka dhagihiyo	Dibindaabyadeedii	Ukuntiyo digaaggoo
Sanka udugga doorsoon	Shalay aan dareensaday	Koodii hor soo degay
Iyo diibka kala xula	Maantay ka daran tahay	Aadmigu ka doodona
Dareemmadi ma daaleen?	Dugsigeedu furan yahay	Tani waa ka duwan tahay
Surka dabinki qoolnaa	Duruustiisu socotaa	Dawlad iyo qabiilnimo
Dalaqdii ma dhiman tahay?	<b>Dagaalkuna habboon yahay.</b>	Weligood ma wada degin Waa laba da'aad oo <b>Midka dagan kan kale dilo.</b>

<b>Afartaa ma wada degey?</b>	Musdambeedka maw galay?	
Taar ma diray digniin sida?	Inta dood wadaagga ah	
Dersi kalena iga maqal?	Ood laga dul boodoo	
	Daruuraha asteysoo	
Daacadoow ma daaloow	Cirka daadsan maw dhigay?	
In Hadraawi door yahay	Kuwa hadalka dooriya	
Gaarriye da' nool yahay	Doc ka yeerka maansada	
Yamyam daadka webi yahay	Loox digniin ma ugu qoray?	
Idaajaana dirac yahay	Door kale ma sugayaa?	
Singub dayaxgacmeed yahay	Dooddina ma furan tahay?	
Dadka kalena danab iyo		
Dambeed iyo horraad yahay	Maansada DAREEN-GUUD	
Dabbaabaad is wada yahay		
Qaarna doobba barad yahay		
Aniguna raggaan daran		
Kan u daran ka daranahay		
Oo dardaaran dhaxal yahay		
Ma ku duubay hadalkii?		
Ma ka digay qabiilnimo?		
Maw dagaalay gobannimo?		
Dadka iyo dalkaygiyo		
Diinta iyo danaha guud		
Daafacooda maw kacay?		
Ma dul maray ujeeddada?		
Dersi shacabka maw dhigay?		
Dinnadiiyo jiirkii		
Dhexda dayr ma uga xiray		
Afarreey ma daabacay?		
Ma u doortay ereyada?		
<b>Dadku sahal u garan karo?</b>		

## Maansada labaad ee ABWAANOW DAREENKAA Waxay leedahay sidaan:

Dabarow lug celiskaa Daymooy wax araggaa Diriow cir jiirkaa Dahaboow dhalaalkaa Daruureey hillaacaa Onkodoow daryaankaa Daadow dhul socodkaa Dooneey sabbeyntaa Daqaroow xanuunkaa Doqoneey shallaaygaa Dumaaleey xasuustaa Dibjiroow harraadkaa Diracoow horseedkaa Abwaanoow dareenkaa Dadweynoow wax maqalkaa Dowladeey xishoodkaa Adna diradiraaloow Daal iyo dhex socodkaa!	Dadkii oo harraadsane Daallan oo hammuun qaba Yaa dariqa aayaha Ugu daadshay qodaxdoo U daboolay weel maran?  Yaa dubaalladaan shiday Nuurkana u daalacay Gudihii u diiddane Dusha qalka uga xiray?  Yaa shalay dorraad yiri Oo duhur ka dhigay subax Yaa dood wadaaggii Dagaal qabaliyuu rogay Soow duruus aqooneed Deellaydu ma aheyn?	Dowladnimada maa sidi Abeesadii dorraadoo Dabagaalle guursaday Dusha layska qabaayaa?  Haddaan hoos u sii dego Ma nin doonayaa jira Darka lagu hirtoo jaba Maxaa uga dambeeyuu Taa uga dan leeyahay I deeqsii haddaan iri Ma u yahay diyaar hadal?  Mase waa duqdii tiri Anoon duminniin reerkaa Dadku ima aqoonsana?
Da'da kale abwaanow Ereyada dalxiiska ah Oo dabarka laga furay Ogaal daajintood iyo Dood iyo is maqalkeed Anna door labaadleey Dacwad kalena waxaan iri Duullaanki dheeraa Ujeeddadana loo dumay Halka dakhalku uga jabay Dib ha loo xusuustee Qabiilnimada yow dada Oo doonayoo wada Yaa qareenka daafaca Ugu deeqay oo raba?	Dugsiyada qur'aankoo Diinta laysku baraayaa Casharrada la daabaco Sadarrada is dabayaal Aayadaha ku daakiran Ereyada dareenka leh Higgaadooda kala duwan Wowga duuban iyo kuwa Deelku ugu dambeeyaa Yaa gadaal wax uga daray?  Yaa diiddan taladii Maansadii dareen guud Aan dorraad ku tebiyoo Kala diraya reeraha?	Ama daba caddeeyihi Digaaggii xeraysnaa Dabookii ka qaad yiri Itaalkiina u diidee Markii uu ka damac dhigay Helay ugu dambaystii Meel yar oo dalooshoon Madaxiisa deeqayn Dabadeedna mooradi Illaa waagu daalaco Ku walaaqay dabadee Waa inaysan degin yiri Aniguba dan seegaye!.
Yaa qalin dawaadkiyo Warqaddiis dul saaraye Damacaaga qoro yiri?  Dekareetadeediyo Yaa dhiga dammaanada Yaa danaha guud iyo Isku daraya kuwa gaar Yaa dakano raadis ah Yaase daafacaya reer?	Da'da maan gaboot sidin Sow duqnimo garaad ma leh Duulku soow ma waansado Sow labaatan dayrood Oon dowlad soo nahay Dadku waaya-aragnimo Dadaalkoodi kama helin?  Ma hogtii dalooшhoo Shalay laga dul boodaan Dib hadduugu noqonnaa? Ma dagaalka maantaa Sida duub caddii hore Daniihi shisheeyaha Lagu daafacayaayaa?	War hooy ina dadoow maqal Qabiilnimadu waa duug Waa daabbadii hore Oo haatan laga degay Markii ay dakaame Kii doonayoo raba Dooc iyo dareen ma leh Waa cadaw dalkeyla leh Kama duwana kii shalay Ii darraan jiroo tegay!

<p>Ninkii dabinkii qoolnaa  Sagaaradi u duugee  Cowshii u dalaq tiri  Oo kan dooni mayn yiri  Kana daayay xariggii  Dammac gaabidiisii  Tiisaa ka sii daran  Abharaam dadkiisii  Kacbadii ku duulaye  Daliilkeeda alamtara  Diintu noogu sheegtoo  Daa'iraadkii lagu diray  Iyo kii dorraad yiri  Mahdi soo degaan ahay  Oo xaramka lagu dilay  Dembi falashadoodii  Tiisaa ka sii daran</p> <p>Da'da kale abwaanoow  Ummadaan dalka iska leh  Ruux duufsan kuma jiro  Waana daacad gabigood  Iga diid haddaan iri  Waa dad Eebbaheeyoo  Kala wada dabeecad ah  Qorshe dowladeed iyo  Dedaal muujin shacab iyo  Dareen lagu gartaa jira  Doqon lagu adeegtiyo  Dabadhilif gumaystuhu  Ku dan raadsadaa jira  Dibjir seegay qadadii  Howshana u daacada  Oon ka daahin baa jira.</p> <p>Dudmo sabab laa'aaneed  Qaar dalkuuga cararee  Derbiyada shisheeyaha  Maanta dawarsadaa jira  Dad wax loo gudboon yahay  Daamankuu afaystaye  Gaar u doonaya jira  Faqiirkii dorraad oo  Manta daara jeexdaye  Diga rogashadiisiyo  Meesha doolku uga baqay  Laga doodaya jira  Ciqaab aad u daran iyo  Dembi lagu mutaa jira.</p>	<p>Duul xishood leh oo gob ah  Waxay doonin baa jira  Dawlad dimuqdaaddi ah  Waxqy diidin baa jira  Haddaan hoos u sii dego  Wax la diiddan yahay iyo  Wax la doonaya jira!.</p> <p>Da'da kale abwaanoow  Ninki darane cudur helo  Oo dardaaran laga qoro  Yaasiinka dabadii  Ma diiddani hadduu kaco  Dhasha dararta caanaha  Ibaha ugu deeqee  Haddii ay durduurtaan  Oo markeey ka daalaan  Dabadeed qaniinaan  Iyadana ma diiddani  Gabar timaha dabatoo  Dumar laga xuloo wacan  Haddii doob rag guursado  Oo ay duqoowdaa  Iyadoon dad laga helin  Haddeey ugu dambeystii  Ku da' gooyso laba wiil  Iyadana ma diiddani  Dawgii loogu tala galay  Haddii doodda lagu wado  Halkii ay ka dabacdona  Laga saaro dayr adag  Haddeey durugto xaajadu  Oo duwane soo galoo  Ooy dariiqa seegtona  La iska daayo gabigeed  Iyadana ma diiddani!.</p> <p>Dood kalena waxay tahay  Digsigii biyeysnaa  Dab la saaray oo karay  Deeqii lagu bisleeyaa  Dubay maaha waa karis  Dembi ula kac loo falay  Dalka looga galay eed  Dadweynuhu u marag yahay  Diiwaansan oo qoran  Daaha kaan ka roginoo  La dagaalin kii wada  Daacad maaha waa tuug.</p>	<p><b>Dood abwaanno curiyeen</b>  Oo danteeda guud tahay  Dalka laga badbaadiyo  Dulun maaha waa faral!.  Da'da kale abwaanoow  Haddii aan daliil gabay  Deelleeyda ka iraa  Xididdada dareeraha  Oogada u kala dira  Kama duwana sheekadu  Waa dardaaran dhaxal gal ah  Waa daryeel kacaannimo  Waa dood abwaannimo  Waana daacad gabigeed  Dad ujeedda gaariyo  Doc ka yeerse kuma darin.</p> <p>Dood kalena waxay tahay  Ma annagaa dalxiis iyo  Dalka khubarradiisi ah?  Sow dadkuu Ilaaheey  Ugu deeqay kama dhalan?  Sow duqowda talisaa  Dastuurkeenna kuma qorin?  Dhaliil daacadnimo iyo  Dood wadaaggoo noo furan  Kii duwaa se yeelkiis.</p> <p>Dood kalena waxay tahay  Dadweynaha adduunkiyo  Dawlaadaha hoggaamiya  Duruufaha dhex yaalliyi  Daalaco ammuuraha  Dadku dabarya koor ma leh  Sida duunyadoo kale  Diintiyo shuruucdiyo  Damiirkaa hoggaamiya!  Waxaan taa ku darayaa  Dufya baalal kuma yara  Mana duusho goroyadu  Waagii habardugaag iyo  Haaddu ay dagaaleen  Oo labada daafood  Ciidamada la soo dumay  Iyadaa la wada dilay  Oo duulba duul yiri  Idinkeey dirkiin tahay  Kii qabiil dugsanayiyo  <b>Dabodhilifna waa sida!</b></p>
---	---	--

<b>Dacwad kalena waxaan iri</b> Anaa dawladnimadiyo Dalkabuu hadlaayoo Daafacaaya labadaba Anaa dulin bareeriyo Dagaal xeel la'aaneed Diidaaya labadaba Anigaa dulqaad iyo Dedaal hagar la'aaneed Doonaaya labadaba Anigaa af dalabiyo Dib u dhigasho hawleed Ka digaaya labadaba!	<b>Deelleeydi curatee</b> Danta loo abaabulay Dulucdiyo ujeeddada Cidna daah ka saarreyn Oo heesta lagu daray Dugsi ma leh qabyaaladi Markii dabarka laga furay Dacar kaydsaneydoo Soo daqiiradeysoo Dareenkii qabiilkaa Durbaankiisi weynaa Darandoorri loo tumay Oo sidaa daraaddeed Darartaa abwaannada Dadkeedina u oon qabo La durduuran mayoo Dariiq loo maraan jirin Haddaan hoos u sii dego Dad ninkii aniga yiri Inta kale iskuma darin Dulucduna waxay tahay Nin waliba ha dilo kii Uu doono weligiis Ama erayo dalab lehe Deelqaaf ah haw qoro Anse duubki waan dhigay Ragga kalena waw digay Waxaan uga dan leeyahay Ma dib dhicin waddanigii Ma dux dhigin laftiisii Mana damin karkiisii Asagaan dugsanayaal.	
Da'da kale abwaanoow Waxaan ugu dambaystii Ku daboolay maansada Doorashadii Rasuulkoo s.c.w. Ilaah Muxumud soo diray Waxyiguna ku soo degay Oo diinta lagu yiri Gaarsii dadkagii Waxaa diiday qaar badan Oo dagaal ku yeeleen.	Dadkeedina u oon qabo La durduuran mayoo Dariiq loo maraan jirin Haddaan hoos u sii dego Dad ninkii aniga yiri Inta kale iskuma darin Dulucduna waxay tahay Nin waliba ha dilo kii Uu doono weligiis Ama erayo dalab lehe Deelqaaf ah haw qoro Anse duubki waan dhigay Ragga kalena waw digay Waxaan uga dan leeyahay Ma dib dhicin waddanigii Ma dux dhigin laftiisii Mana damin karkiisii Asagaan dugsanayaal.	Waagii darwiishkina Waasagii dadyahow yiri Idinkaa dalkaba lehe Dawlad maad u noqotaan Oo laga dareersaday Doorkii kaloo xigay Waagii dadweynuhu Daryeel ummadda ugu kacay Daaficii gumaysiga Gobonnimo u dirirkii Iyadana dad baa jiray <b>Isticmaarku duufsaday!</b>

Maasadaan la magac baxday abwaanow dareenkaa, waxay noqotay maansadii lagu qabbiray silsilladdii Deelleey, marka laga yimaado tii wayddiimaha aheyd ee laashin Cabdulle Raage, lana magac-baxday; **"DAREENKEYGU MA OGGOLA!"** Laashin: **Xuseen Sh. Axmed Hilowle "Kadare"** Alle ha u naxariistee, wuxuu ka tegay dhaxal iyo sooyaal gadaashiisa loo aayidoono. Ma filayo inuu jiro ruux ka qiima badan ninkii farta aan qorayno noo gun dhigay, inuu imaanayo hal-aqoon nooga qiimi badan Eebbe ha u raxmadee.

**W/Q: Xasan Cabdulle Calasow "Shiribmaal"**

**Imeyl:**

**cuute23@hotmail.com**

**shiribmaal@gmail.com**

**laashin77@gmail.com**

**www.laashin.com**

**Tel: 0046-700345789**